



BØRN OG UNGE  
Aarhus Kommune



# AQRI

– SIDA AAD U TAAGEERI KARTID WAX  
AQRINTA UGU HORAYSA OO ILMAHAAGU  
KALIGII WAX AQRINAAYO


## HORUMARKA WAX AQRINTA ILMAHAAGA

Ilmahaagu waxuu isticmaalaa xeelado kala duwan oo ku xiran hadba sida ay isagu ama iyadu wax aqriniisu ama teeda ay u horumarsan tahay. Bilowgii, ilmaha inta badan waxuu xusuusan doonaa oo u maleynayaa in badan erayada ku salaysan sawirada buugga iyo dulucda sheekada.

Ilmuu wuxuu si tartiib tartiib ah is barbar dhigi doonaa isaga ama iyada erayada ugu horeeya / dhawaaqa waxyalaha uu moodo. Kadib, isagu ama iyadu waxay bilaabi doonaan isticmaalka dhawaaqyada xuruufaha oo dhan iyagoo laysu wada geeyay oo erayo noqday. Tartiib tartiib wax aqrinta ilmaha waxay noqon doonaan kuwo isku xiran oo aan hakad lahayn.



**WAXAAN KA ARKI KARAA  
INAAD TIJAABINAYSID OO  
AAD WAX AQRINTA KUSII  
FIICNAANAYSID.**



**MA SAMEEYN KARTAA  
DHAWAAQA XARAFK  
UGU HOREEYA?**

**SSS**

## TAAGEER WAX AQRINTA ERAYADA ILMAHAAGA

Hadii ay jiraan erayo uu ilmahaaga aqrin Karin, waxaad ku taageeri kartaa

- ilmaha ha qiyaso isaga oo kaashanaya sawirada ama sheekadu waxay ku saabsan tahay
- dhiiro geli ilmahaaga inuu sheego xarafka ugu horeeya /dhawaaqa xarafka
- sheego xuruufaha ugu horeeya/dhawaaqyada erayga. • eryaga kor uga aqri ilmahaaga.

Aaasaas ahaan ilmahaaga ha sixin hadii si qalad ah wax u aqriyo ilaa ay saameen ku yeelanayso fahamka waxuu aqrinaayo. Ilmahaaga markuu dhameeyo aqrinta qoraalka dib baad ugu laaban artaa oo eray ama labo weydiin kartaa

## HEERKA BUUGGA

Buugaagta ilmahaagu aqrisanayo waa inay u dhigamaan heerka aqriska ilmahaaga. Ilmahaagu waa inay awoodaan inay aqriyaan inta badan ereyada naftooda. Haddii aad dareento in qoraalka uu mid aad u adag tahay, waa in aad kor loogu akhriyo. Kadib ilmaha wii tijaabin karaan in ay aqriyaan qoraalka naftooda. Waxay noqon kartaa taageero ilmaha had-dii aad farta ku fiiqdo erayada aad aqrinaysid

## ILMAHAAGA U YEEL XIISO UU WAX KU AQRIYO

Ilmaha hadba xiisaha uu u hayo wax aqrinta inta uu la eg yahay bay wax aqrintiisuna u fiicnaan doontaa. Ilmahaaga waxuu wax aqrinta rabi doonaa hadii uu kaa arko xiiso iyo dhiiri gelin.

Ilmahaaga waxaad dhiiri gelin kartaa hadii aad tiraahdo:

- waan arkayaa inaad wax aqriska baranaysid waad kusoo fiicnaatay waxaqrinta.
- waan arki karaa inaad isku dayaysid inaad adiga aqrisid erayda dhibka ah.
- Waxaan rabaa inaan marka kale wax wada aqrinn.

Waxaa muhiim ah inuu ilmahaaga wax aqrinta tababar ku sameeynayo uuna ku faraxsan yahay.